



Date: 04/07/2020

WAR-SAXAAFADEED

Muqdisho, 04-ka Julay, 2020, Dowladda Soomaaliya waxa ay si kulul u cambaareyneysaa Weerarkii Wuxushnimada ahaa ee Argagixisadu ku beegsadeen dad Shacab ah oo ku sugnaa goob laga cunteeyo oo ku taalla duleedka magaalada Baydhabo, halkas oo ay ku dileen 5 qof, halka toban qof oo kalana ay ku dhaawacmeen.

Dowladdu waxa ay u tacsiyeyneysaa Qoysaskii ay Eheladooda ku waayay weerarkaas, waxayna Caafimaad taam ah u rajeyneysaa kuwii ku dhaawacmay.

Sidoo kale dowladda Soomaaliya waxa ay ammaan iyo bogaadin u soo jeedineysaa ciidamada amniga oo saakay ka hortagay weerar naftii halignimo ah oo ay kooxaha naflacaaridka ah qorsheynayeen in ay ku bartilmaameedsadaan dhismaha Xarunta Ciidamada Ilaalada Canshuuraha Berriga oo ku taalla dagmada Xamar jajab ee Gobalka Banaadir.

Hal qof oo ahaa ninkii waday gaariga Qaraxa lagu soo raray ayaa ku geeriyyoda isku daygaasi, 6 qof oo ay ku jiraan ciidankii gaariga is-hortaagay ayaa ku dhaawacmay, waxaa sidoo kale burbur soo gaaray dhismaha xarunta oo dhawaan dib u dhis lagu sameeyay.

Dhammaan weeraradan ayaa tusaale cad u ah sida ay usii tabardareynayaan kooxaha xagjirka Soomaaliya, iyadoo ay taasi barbar socotay dhalliyarada kasoo laabaneysa fikirka xagjirka, oo uu ugu dambeeyay Maxamed Abuukar Maxamed oo ahaa Horjoogihii Al Shabaab u qaabilسانا dhaqaalaha Gobalka Shabeellaha Hoose.



DHAMAAD